No. 2

# IFTIINKA - AQOONTA
## (LIGHT of EDUCATION)

——oo——

## AFFAR IYO TOBNAADLE
## (FORTNIGHTLY)



**WAKIILKA MAAMULA**

**QORAHA**
**Shire Jaamac Axmed**

**MUQDISHOW**
**Soomaaliya**
**November 30 1966**

# FARTA FURAHEEDA

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| *Dhawaaq gaaban:* | a | i | e | o | u |
| *Dhawaaq dheer:* | āa | ii | ee | oo | uu |

## XURUUFTA

| *Xarafka* | | | | *Erayga* |
|---|---|---|---|---|
| b | | — waa bir | — waa bal | — waa bad |
| j | | — waa tin | — waa tog | — waa takar |
| t | ج | — waa jiis | — waa jid | — waa jaad |
| x | ح | — waa xas | — waa xil | — waa xishood |
| kh | خ | — waa khamro | — waa khad | — waa khayr |
| d | | — waa duub | — waa dab | — waa dii |
| r | | — waa rabi | — waa run | — waa ruun |
| s | | — waa sin | — waa sun | — waa suun |
| sh | ش | — waa shan | — waa shib | — waa shir |
| dh | ط | — waa dhir | — waa dhul | — waa dhal |
| c | ع | — waa caro | — waa ceel | — waa ciil |
| g | | — waa giddi | — waa gal | — waa goob |
| f | | — waa faras | — waa fal | — waa fallaar |
| q | ق | — waa qab | — waa quud | — waa qool |
| k | ك | — waa kab | — waa kulayl | — waa koob |
| l | | — waa laar | — waa lun | — waa labo |
| m | | — waa maro | — waa maal | — waa miis |
| n | | — waa nabar | — waa nal | — waa naag |
| w | | — waa war | — waa wan | — waa wiil |
| h | | — waa hooyo | — waa hal | — waa hadal |
| y | | — waa yey | — waa yar | — waa yaanbo |
| ' | | — waa rì | — lo' | — waa la'aan |

## HADALKAAN AKHRI

Fariiso halkaan — Cun hilibkaan — Biyahaan cabb — Sheeg hadalka — Akhri dersiga — Tag maanta Beled-Weyne — Sug ninka maqan — Shaqee berri.

Geela ka waraabi ceelka — Ariga soo daaji — Macallinka hadalkiisa maqal — Weligaa nin jiis ah ma aragtay? Af-Jarman ma taqaan? Haa, Af-Jarman iyo Ruush ba waan aqaan. Af-Faransiis ma taqaan? Maya, Af-Faransiis ma aqaan.

Waxaan aqaan Af-Ingriis iyo Carabi iyo Hindi. Adigu yaad tahay? Anigu waxaan ahay Soomaali — Wiilku yuu yahay? — Wiilku wuxuu yahay Afrikaan.

---

## TIXAHAAN BARO

Issagu ma askeri baa?

Maya, issagu askeri ma aha, waa arday.

Issagu ma karraani baa?

Haa, issagu waa karraani, waa na macallin.

Cabdi ma shufeer wanaagsan baa?

Maya, Cabdi shufeer ma aha, issagu waa injiyeer.

Naagtu ma macallimad baa?

Haa, naagtu wa macallimad wanaagsan. Wax na way taqaan.

Adigu ma shaqaale baad tahay?

Sida runta ah, anigu shaqaale ma ahi, laakiin waan jeclahay shaqada.

Hooyadaa iskuul ma dhigadtay?

Maya, hooyaday weligeed iskuul ma dhigan. Waxay bilawday wax barrashada hadda. Iskuulka hore way dhamaynaysaa mar dhow.

Walaalkaa Warsame, Af-Talyaaniga ma yaqaan?

Haa, inyar buu yaqaan. Wuxuuse aad iyo aad u yaqaan Af-Soomaaliga.



## TIXAHAAN BAL AKHRI

| | | |
|---|---|---|
| Qado cun | — | Anigu waxaan cunayaa qadada — |
| Akhri joornaalka | — | Issagu wuxuu akhriyayaa joornaalka |
| Aad guriga | — | Iyadu waxay aadaysaa guriga |
| Nasso berri | — | Adigu waad nassan doontaa berri |
| Cun cashada | — | Annagu waan cunaynnaa cashada |
| Keen shaah | — | Idinku waad keenaysaan shaah iyo caano |
| Seexo caawa | — | Iyagu way seexan doonaan caawa. |

Saacaddu waa intee (immisaa, meeqa)?

| | |
|---|---|
| Saacaddu waa hal saac iyo nus. | 1:30 |
| Saacaddu waa laba saac iyo rubuc. | 2:15 |
| Saacaddu waa saddex saac. | 3:00 |
| Saacaddu waa affar saac iyo shan daqiiqo. | 4:05 |
| Saacaddu waa lix saac. | 6:00 |
| Saacaddu waa toddoba saac. | 7:00 |
| Saacaddu waa siddeed saac. | 8:00 |
| Saacaddu waa sagaal saac. | 9:00 |
| Saacaddu waa toban saac. | 10:00 |
| Saacaddu waa kow iyo toban saac. | 11:00 |
| Saacaddu waa laba iyo toban saac. | 12:00 |

---

## SHEEKADAAN AKHRISO

| | | |
|---|---|---|
| Cali | : | Magacaa? |
| Cabdi | : | Cabdi! |
| Cali | : | Xaggee jiraa diraktorkii xaafiiskaan? |
| Cabdi | : | Muu joogo, wuxuu jiraa Hargeysa. |
| Cali | : | Ma ii sheegi kartaa goortuu imanayo? |
| Cabdi | : | Wuxuu imanayaa berri galab. |
| Cali | : | Maxaad (adigu) doonaysaa? |
| Cabdi | : | Waxaan doonayaa shuqul. |
| Cali | : | Shuqul hadda ma haynno. Kaalay mar kale. |
| Cabdi | : | Markee imaadaa? |
| Cali | : | Waxaad timaaddaa laba berri (cisho) kaddib. |
| Cabdi | : | Waa yahay, waan imaanayaa. Mahadsanid. |
| Cabdi | : | Waan dadaalaynnaa. Aan is aragno. |
| Cali | : | Mahadsanid. |
| Cabdi | : | Wax ma aha. |
| Cali | : | Waan tegayaa hadda. Iga raalli ahow, haddaan ku dhibay. |
| Cabdi | : | Wax ma aha, ima aadan dhibin. |
| Cali | : | Nabad gelyo! |
| Cabdi | : | Nabad gelyo!! |

## BEERAHA

Beerle — Beeraley — Wuu falayaa — Yaanbo — Dhul — Geel — Dameer — Dibi — Sac — Caano — Burcad — Farmaajo — Tuulo — Sarreen — Qamadi — Messago (haruur) — Digir — Galley — Cubdi — Digo-xoolaad — Waraabi.

Beerluhu wuxuu yaanbada ku falaa dhulka. Beeraleydu waxay ku dhaqantaa tuulada. Beerluhu wuxuu raacaa ariga iyo lòda. Wuxuu na falaa dhulka. Issagu wuxuu leeyahay dibi iyo dameer iyo rati iyo dooro (digaag) badan. Dibigu wuxuu jiidaa falaha. Caanaha waxaa laga lisaa lòda iyo geela iyo ariga ba. Beeraleydu, caanaha waxay ka sameeyaan farmaajo iyo burcad. Waxay had-dana caanaha kala baxaan subag. Beeralaydu, beeraha waxay ku falaan dameerro iyo dibiyo. Awrtu waxay qaaddaa qoryo badan, iyo haruur iyo galley, iyo cubdi. Markii uu beerluhu falayo beerta, wuxuu ku firdhiyaa dhulka digir iyo haruur iyo miro kale. Digada xoolaha iyo uusku waxay wax taraan beeraha. Digada iyo uuska xoolahu, aad iyo aad bay dhulka u xoojiyaan oo wax u taraan. Dibidu waxay waraabiyaan beeraha. Wadaamo waaweyn ayay dibidu kasoo jiidaan ceelalsha.

---

### Weydiinta

*Ka jawaab hadalladaa.*

1 — Weligaa ma aragtay yaanbo?
2 — Muxuu ku falaa beerluhu yaanbada?
3 — Maxaa laga sameeyaa yaanbada?
4 — Beeraleydu xaggee ku dhaqantaa?
5 — Sheeg xoolaha, beeraleyda wax tara?
6 — Maxaa laga sameeyaa caanaha?
7 — Maxay wax taraan digada iyo uusku ba?
8 — Beerluhu muxuu ugu firdhiyaa digada xoolaha dhulka?

---

### MAHMAAHDAAN BARO

Waxaa la yiri labo labo laguma reebo: Gar hagag, laguma reebo .Faqri na faqri laguma reebo.

Waxaa la yiri : Rugtaada iyo runtaada ba daddka looma sheego.

Waxaa la yiri : Saddex nin ma helshiiso: Nin qab weyn iyo nimaan u qabin.

Nin quud jecel iyo nimaan u quurin. Nin qossol badan iyo nin qoonsimaad badan.



## NINKII RABAY INUU OGAADO WARKU SIDUU U FAAFO

Waxaa la yiri, nin ayaa faras fuulay. Meel fog ayuu tegay. Ninkuu wuxuu rabay inuu ogaado sida warku u faafo. Laba beri, meel cidda looga socdo, ayuu inta tegay, oo dudumo korkeed fuulay, soddohdi oo ku xil leh, caayey. Markuu soddohdi cayeyey, dudumada godkeeda ayuu afku ku ridtay. Taas na wuxxu ula danlahaa, in uu ogaado in aan cidna maqlayn. Goonyihiisa na wuu iska dhugtay, markuu hadalka cayda ah sheegayey.

Markuu yiri, wixii uu rabay, ayuu wuxuu yiri «Bal dadku, waa kan yiraahda, warku wuu faafaa e, soddohday oo xil lihu ha i maqalsho».

Gurigii ayuu ku soo noqday. Faraskii markuu ka soo degay, ayuu soddohdi arkay. Wuu salaamay. Wuxuu yiri «Soddoh, bal iska warran?» Soddohdii waxay ku tiri: Maandhow, dareen adiga kaa weyn ma ogi !! Ninkii wuxuu yiri «Oo soddoh, dareenkaasi waa maxay?» Markaasay soddohdii ku tiri: Maandhow waa adigii wanaagsanaa, ee maxaa ku baray caydayda? !!

Markaasaa ninkii afka kala qabtay, oo naxay. Wuxuu ogaaday in warku faafo. Wuxuu yiri: Soddoh; yaa kuu sheegay, inaan ku caayay? Waxay tiri «Maandhow dabaylaha ayaa siday warka!

Soomaalidu waxay tiraahdaa «Faq fagaaro, ayuu tagaa».

---

### GABAY

Tol iyo xidid tagaabo iyo gacal
Talo nin loo geysto
Tows kama bogsado nimaan walaal
Tiiriyaa lahayne
Naftaan lagula taageerahayn
Looma taag helo e (Lama yaqaan ninkii tiriyey)

---

Haydaarto meelshii leh waa laga huleelaaye
Waa lagu hirtaa meel haddii halabo kuu taale
Sayid Maxamed (Ina-Cabdille Xassan)

## WAX GARAD YAA WEEYE!

Waxaa la yiri, guddi ayaa meel lagu qabay. Guddigu na goie weyn ayuu fadhiyey. Dadkii oo idil ayaa ka soo qayb galay. Naago iyo rag iyo dadkii oodhan shir ayuu u fariistay. Dhammaantood waxay rabeen, inay talo dhexdooda ah, ay ka hadlaan. Fadhigii wixii la wadiyo, wixii la wadiyo, talo waxay ku dhammaadtay, in rag wayeel ah, xaajada loo saaro. Raggaas waayeelka ah, waxaa lagu magacaabay guddi. Geedka lagu hadlayey, oo xaajada lagu qabay, waxaa korkiisa saarnaa wil yar.

Wiilka talada lagu ma darin. Wuxuu maqlay nimankii oo leh, war waayeel talada u saara. Wiilkii wuxuu ku yiri nimankii «Ha dhihinina talada, waayeel u saara, ee dhaha wax-garad u saara» Taasna wuxuu ula danlahaa in talada lagu daro dhallin-yarada. Nimankii waxay yiraahdeen «Waa run».

---

## BIYAHA

Biyuhu xaggee ka yimaadaan?

Biyuhu waxay ka yimaadaan cirka, dabadeed na daad bay noqdaan. Markaas kaddib ayay webiyada iyo ceelalsha buuxiyaan. Biyuhuu haddana waxay ka soo dhalshaan, ama ka soo burqadaan ilaha ceelalsha iyo laasaska.

Dadku wuxuu ka cabbaa biyaha macaan. Biyaha baddu se way dhanaan yihiin. Cusbo badan ayaa ku jirta. Dadku maanta wuxuu ku dadaalayaa in cusbada biyaha badda laga bixiyo, oo markaas beeraha iyo xoolaha ba laga waraabiyo. Taasi na shuquiweyn iyo lacag ayay u baahan tahay. Dhulka iyo beeraha ba waxaa lagu waraabiyaa biyo macaan. Inkasta ba badda waxaa ku nool nafley kale oo badan. Nafleydaasu biyaha badda, ayay ku noolaan karaan. Dalka Soomaaliya, biyuhu way ku yar yihiin. Sida runta ahi se, biyo badan oo ku filan dad iyo duunya ba way ku jiraan. Dadkayaga waxaa ka maqan, sidii loola soo bixi lahaa biyahaas, oo loogu intifaaci lahaa. Dhulkayaga dadku weli waxay ku dirira-an biyo la'aan.

Afrika dhulal ka mid ah, biyuhu way ku yar yihiin. Waxaa ka mid ah. «LAMA-DEGAANKA AFRIKA» (SAXAARADA). Dadadka ku nool lama-degaanyadaas, waxay ku dadaalyaan had iyo-jeer, sidii ay ugala soo bixi lahaayeen biyo dhulkaas. Umadaha Middobay laanta u qaybsan beeraha iyo cuntada F.A.O. waxay ku daddalaysaa sidii ay ku xaqiijin lahayd taladaas. Dawladda-Soomaaliya haddaynan ka shaqayn, sidii loo heli lahaa biyo dadka guuraaga ah ku filan, dhib badan ayay kala kulmaysaa, sidii loo dejjin lahaa dadkaas.

Biyaha cirka ka yimaada, ayaa ina ku filan haddii aan celshanno. Kumanyaal tan (ton) oo biyo ah, ayaan xilli walba luminnaa. Jiilaalkii na abaartu markay timaaddo dadku biyuu waayaa.!!!



---

## DHISMAHA AFKA

| | |
|---|---|
| Waan | Waan |
| Waad | Waad |
| Wuu | Way |
| Way | |
| Waan cabbay shaah shalay | Waan cabbnay shaah shalay |
| Waad cabbaty shaah shalay | Waad cabbteen shaah shalay |
| Wuu cabbay shaah shalay | Way cabbeen shaah shalay |
| Way cabtay shaah shalay | |

---

### Hadalladaan ku dar falid tagtay

| | | | |
|---|---|---|---|
| Anigu waan ........................ | Marka | shalay |
| Adigu waad ........................ | » | » |
| Issagu wuu ........................ | » | » |
| Iyadu way ........................ | » | » |
| Annagu waan ........................ | » | » |
| Idinku waad ........................ | » | » |
| Iyagu way ........................ | » | » |

## Hadalkaan Akhri

Nuur: Kani waa kuma?

Xassan: Waa Xassan! See tahay?

Nuur: Waa nabad Ilaah mahaddi.

Xassan: Walaalkaa ma arkin maalmahaan. Horta, xaggee buu jirra?

Nuur: Wuxuu jiraa Baydhaba.

Xassan: Walaalshaa Xaliimo, ma la jirtaa assaga?

Nuur: Maya, lama jirto.

Xassan: Maxaad samaynaysaa hadda?

Nuur: Waxaan baranayaa Afkayaga hooyo.

Xassan: Yaa kuu dhiga Af-Soomaaliga?

Nuur: Waxaa ii dhiga Faarax.

Xassan: Faarax, ma macallin wanaagsan baa?

Nuur: Haa! Sidaas baan u malaynayaa. Sida wax loo dhigo aad iyo aad buu u yaqaannaa.

Xassan: Xaggee buu wax ka soo bartay?

Nuur: Wuxuu wax ka soo bartay Universitiga u weyn Iglan.

Xassan: Maxaa laga dhigaa Universitigaas?

Nuur: Wax walba waa laga dhigaa. Afaf iyo cilmiga cussub iyo teknoolojiga iyo cilmiga sayniska iyo matamaatikada iyo injiyeernimada iyo wax kale.

Xassan: adigu hadda maxaad baradtaa oo kale.

Nuur: Waxaan bartaa matamaatikada la yiraahdo (kalkolos)

Xassan: Kalklos waa maxay?

Nuur: Waa xissaab kore. Way wanaagsan tahay.

Xassan: Adigu intee af ku hadalshaa?

Nuur: Waxaan ku hadlaa shan. Af-Ingriis, Carabi, Faransiis, Ruush iyo Afkayga hooyo.

Xassan: Hadda, waan tegayaa, iga raalli ahow. Markale baan sheekeysan doonnaa. Waxaan ka gaarayaa qadada.

Nuur: Waa hagaag. Nabad gelyo.

Xassan: Nabad gelyo. Tu-san.

Nuur Tu-san. Nabadey!!!!!!



## SHINBIRO IYO UGAARTAA

Waxaa la yiri nin ayaa shinbiro ugaaranayey. Shinbiro badan ayuu dilay. Markuu mid dilaba, wuu ooyayey. Ilmadu waxay ka lahayd dililiq. Issaggo markaas hal shinbir ah dilay, oo ooyaya, ayaa waxaa aragtay shinbir kale. Shinbirtaasi na waxay la joogtay saaxiibteed. Waxay ku joogeen geed korkiis. Shinbirtu waxay ku tiri saaxiibteed, inta dnugadtay ilmadiisa, Alla!!! Miskiin weeye ninkaasi!! Markaan ilmadiisa arko ba, waan qalbi xumaadaa. Allow! yaa u naxariista.!!

Markaasaa shinbirtii kale ku tiri «Naa heedhe, ha eegin ilmadiisa, ee waxaad eegtaa, gacantiisu waxay samaynayso.»

---

## MAHMAAHDAAN BARO

Waxaa la yiri: Rag waxaa u daran garti ciil ka yeelshe.

Waxaa la yiri: Rag i daa kugu ma daayo, ee aan is daynno ayuu kugu daayaa.

Waxaa la yiri: Saddex waa wad karis. Orod dheeri, iyo dabaal aqoon, iyo gabasha aqoon.

Waxaa la yiri: Xaglo laaban xoola kuma yimaadaan.

Waxaa la yiri: Xil-necbi xoolahaagay u daran tahay.

Waxaa la yiri: Wax hubso hal dhan baan dhaafsaday.

---

## NINKI DAMCAY INUU NINKALE KA NIXIYO

Waxaa la yiri nin ayaa ninkale u yimid. Wuxuu damcay inuu ka nixiyo. Wuxuu yiri: Hebelow!! Ma maqalshay, in dunidii la rogayo. Markaasaa ninkii kale yiri: «Kow» Goormaad maqashay in dunida la rogayo?!! Markaasaa ninkii kale yiri: Waxaan maqlay. shalay. Culumadii baa masaajidka ka sheegtay. Waxay yiraahden: adduunkii waa la rogayaa! Ninkii kale wuxuu yiri siduu wax kale uga sugayey. Wallaahi, haddii dunida la rogo, aniga dan baa iigu jirta!!!

Markaasaa ninkii rabay inuu ninka ka naxsho yiri: Oo sidee dani kuugu jirtaa, haddii dunida la rogo? Miyaadan maqal waxa dunida ku nool oo dhan in la rogayo?!!!

Markaasaa ninkii kale yiri: Taasi waa ii wanaagsan tahay. Maxaa yeelay ratigii aan raran jiray, ayaa iga garba beelay. Marka haddii dunida la rogo dan baa iigu jirta. Maxaa yeelay caloolsha ayaan ka raran lahaa.!!

Waxaa la yiri: «Qolo qasaarto wax u ah, qolo kale waxay u tahay faydo».

---

## NABSI

### GABAY

Adduun waa har labadiisa gelin — waa na la hubaaye
Hal galgaladtay waxaa looga dhigay — yaan nin na u harine
Mar uun baa sabool la harqiyaa — hodanna deegaaye

---

## NABAD

Illeen godobi surinkaad marta ba — sabad qarsoon weeye
Illeen nabadi sahaydaada ood — sidadto uun weeye

---

## INKAAR (mahmaah

Wii sagaaro iyo way sokeeye iyo wararac damal. saddexdaas midna illaacadoodu ma qarsoonto.

---

## KALGACAL

Ha is qadinnina, waad kala tegaysaane.
Ha na is quursannina, waad is nacaysaane.



## WIIL-WAAL IYO REER BARTIRE

*Nin Reer Bartire ah:*

Shalay galab haddaan fadhiyay — faro goldoodkeenna
Assaan faan Bartire been ahayn — ama se fooxaalli
Wallee faaraxow faqaan ogaa — kuma fayoobaadtid

*Wiil-Waal:*

Bartire waa riffaa Eebbahay — xan iyo been raacshay
Runna uma tukado oo Ilaah — raatib kama yeelan
Waa roob xagaa oo warkiis — meel na uma raaco

---

## MIRAHA DALKEENA

Afgooye ama Jannaale mar na ma tagtay?

Waxaa ku yaalla, beero waaweyn oo ballaaran oo qurux-badan. Geedo dhaadheer na Webiga Shabeelle goonyihiisa bay ku yaallaan. Beerahaas waxaa ku yaalla miro badan. Dhaqaalaha dalkeenna na wax badan ayay taraan. Waxaa ka mid ah mirahaas babbay, canbe, muus, liimo, oranji, qare, bumbeelmo, seytuun iyo kuwo kale oo badan. Miraha dalka Soomaalida ka baxa, waxay xoojiyaan dhaqaaleheenna. Dadku wuxuu cunaa mirahaas. Vitamiin badan na way leeyihiin. Waxaa ka mid ah vitaminka A iyo D, F, iyo kuwo kale. Vitaminnadaasi oogada dadka iyo dhismaha lafaha wax badan ayay taraan.

Beeraha waxaa ilaaliya niman. Waxay ka ilaaliyaan shinbiraha iyo bahallada kale oo dila beeraha. Dadka qaar baa jecel inay goostaan miraha, ayagoon weli bislaan. Nimankaas beeraha ilaaliyaa marka way ka celiyaan. Adigu ma jecelshahay inaad cunto mira ceeriin? Maya, Anigu ma jecli. Waxaan jeclahay inaan cuno miro bisil. Weliba waxaan sii jeclahay kuwa engegan oo dhaqan.

## MAHMAAHDAAN BARO

Waxaa la yiri: Dagaal gondahaaga, ayuu ka dhalshaa ee u tog hay.

Waxaa la yiri: Lug na baqa ugu joog, lug na dagaal.

Waxaa la yiri: Nin kaama adkaan, jeeruu adiyo dadka iskiin nacsiiyo.

---

## SIFFAYNTA (dhismaha)

| | |
|---|---|
| jid dheer | — kaasi waa jid dheer ee mar. |
| gabadh gaaban | — taasi waa gabadh gaaban oo qurux-badan. |
| magaaladu | — magaaladu way weyn tahay. |
| beledku | — beledku wuu yar yahay. |
| ninkaasi | — ninkaasi wuu xun yahay. |
| iskuulku | — iskuulku wuu ballaaran yahay. |
| miisku | — miisku wuu cussub yahay. |
| hooyaday | — hooyaday edeb bay leedahay. |
| Ashkiro | — Ashkiro waa naag gaari ah. |
| Geelle | — Geelle waa nin miyir le. |
| macallinku | — macallinku waa nin aqoon le. |

---

## SHEEKADAAN AKHRI

### Nin caqli le

Waxaa la yiri: nin indho la' ayaa naag qabay. Markaas ayaa naagtiisii nin kale ka bartay, oo ka xadi jiray. Habeyn ayaa ninkii iyo naagtiisii oo aqalka wada hurda, ayaa ninkii ku soo guday. Habeyn barkii ayaa ninkii indhaha la' aa wax dareemay, oo uu gartay inuusan goobta keligi joogin. Markaasuu naagtii is yiri taabo. Wuxuu taabtay addin xaad le. Markaasuu ku yiri naagtii «Naa hebla!! Addinkaan ma adigaa le?» Markaasay tiri «Haa, anigaa le» Markaasuu haddana addin kale oo xaad le taabtay. Wuxuu yiri «Addinkaan kale na ma adigaa le?» Say te «War doqon yohow!!; waa kii hore. Ninkii wuu yaabay. Wuxuu ogaa addimada naagtiisu inaynan xaad lahaan jirin. Wuxuu yiri naagtii markuu ogaaday in ninkale meelsha la joogo» Hebla!! Berrito yaanan affar kub oo laba xaad leedahay, yaanan kaa waayin. Waxaad la timaaddaa shirka berri la qaban doono sidaas. Haddii kale waxaa kugu caddaanaya inaad tahay naag ceeb le.



A — WAQTIGA (Goorta)

Maalintu waa affar iyo labaadtan saac. Saacaddu na waa lixdan daqiiqo. Toddobaadku waa toddoba maalmood. Sanadu na waa 365 maalmood. Sanadu waa 52 toddobaad.

B — Sanadu waa affar xilli:-
Gù — Jiilaa! — Dayr — Xagaa.

1 — Gugu: dooggu waa cagaartaa, dabaylshuna way fiicnaadtaa.

2 — Jiilaalka: kulku waa badtaa, habeynku na wuu dheeraadaa.

3 — Dayrta: cirku wuu saafiyoobaa, caleemaha geeduhu na waa dhacaan.

4 — Xagaaga: qabawgu wuu badtaa, roob yari na wuu da'aa. Habeynku na wuu yaraadaa.

---

## QORRAXDA

1 — Qorraxdu way dhaladtaa subaxdii, markaas ayaa waagu baryaa, galabtii na way dhacdaa. Markaasaa habeynku soo galaa.

2 — Markay qorraxdu soo dhaladto, iftiin ayaa meel walba gaara. Markay dhacda na, mugdi ayaa meel walba saabta.

3 — Qorraxdu waxay u tahay lagama-maarmaan nololsha dadka, xoolaha, naqa. iyo geedaha.

4 — Kulka qorraxdu wuu darnaadaa jiilaalka. Fallaaraha iftiinkeedu na way u daran yihiin oogada dadka. Taasi waa haddii dhulku uu kulul yahay. Afrika qorraxdu way ku badan tahay. Dhulalka kale se, oo ay ka mid yihiin Yurub, iyo Aasiya iyo Ameerika qaarkood, qorraxdu way ku yar tahay. Dadadkaasi waxay u baahan yihiin qorrax badan. Dadka se Afrika deggani uma baahna qorrax. Fallaaraha qorraxdu, markii aynan kululayn way u roon yihiin oogada. Midabka dadka iyo geedaha iyo xoolaha, iyadaa siisa.

5 — Inta nafleyda ah oo dhan, waxay nololsha ka helaan qorraxda Haddaan qorraxi jirin, nololi ma jirteen. Caleemaha geedaha iyo ubaxa ba, waxaa midabka siiya qorraxda. Taasi

iskaba daaye, iyada u sal ah nolol oo dhan. Fallaaraha-qorraxda waxaa laga sameeyaa «Xoogga-elitirikada». Dabka halkaas ka soo dhalsha waxaa lagu sameeyaa wax badan oo dadka wax tara. Waxaa ka mid ah warshadaha, iyo nalalka iyo wax kale oo badan.

———————

## GABAY

Nin dhadhamiyayow!! diini ma wax laga dhergaa baa
Nin dhimil qabow!! waalid ma wax laga dhirfaa baa
Nin dhul marayow!! soori ma wax lagu dhintaa baa

(Jaamac Jirrid)

———————

## GABAY

Dab wax guba dayuurado wixii nala ku sii daayey
Dubaaqooyinkii nagu dhaciyo daqarradii dhiigga
Darroorkii naga dhintiyo duq iyo waayeelka
Durdurkii lòday naga dhaceen iyo dalawadii geela
Maxajjabad daboolnayd wixii gaal dukhuulaayey
Dulshaan jeexnay, doygaan marmiyo cagaha daalkooda
Dibindaabyadii nagu dhacdiyo Webi dabaalshiisa
Annagu diidi maynnee horaa dayin noo qoraye
Anigaan faranji dooradu ku taal nabad ka doonayne
Anaa diiday maantuu lahaa deeqan iga hooye
Anigaan labada daarood tan hore darajadeyneyne
Annagu waa dillaannay ee ninkii dawladnimo haysta
Ee daarta inuu jiiffayiyo diric is moodaaya
Goortaan anigu daahii ka kaco digada yuu xaaqin!!

(Ina-Cabdille Xassan)



## FARDO - BADRID

Daraawiish ayaa waxay ku helshiisay maalin in fardaha la badro. Badarkaas waxaa ka soo qayb galay fardo badan. Waxaa loo malaynayey in fardo wanaagsan ay soo dheereeyaan. Waxaa se markii danbe, soo dheereeyey faras caadto ah, oo aan loo filayn. Sayidkii wuxuu gabay ku yiri:

Daraawiish dhammaanteed hadday daabadda u fuulshay
Darmaankii yaraa oo sidii dalagsamaa weydda
Duhur bay ahayd maalintii duubka loo xiraye
Ninkii diric is moodow rag waa daashanoo kale e

(Ina-Cabdille Xassan)

———————

## EEDSHEEGAD

## GEERAAR

Meelaan gaalo amiiriyo Ingriis iyo Talyaani
Mid na joogin albaabka
Ee nin Islaamuhu joogo, oo ashahaadka yaqaan
oon laguu ogolay
Asbaabtii ka danbaysa, allow yaa dib ogaada!-
Wixii laysku ogaa, iyo axdigii rabbigay,
Jaamicii la illow,
oo oodihii laga guuryey,
Arrintaa ragga yeelay, iyo asbaabtii ka danbaysa,
allow yaa dib ogaada!!
Gurigayga agtiisa, iyo albaabkaan xukumaayo,
Irdihiisa kalleexo, oo yaan la ii imanin,
Anna aan amar haysto, wax na hayla ogaannin,
Waxa aan uunku arkayn, iyo talo aydin haybowday,
Iyo ugub weeye sidaasu, inuu aadmigu weelo,
Oo Soomaali irdhowdo, oo ilsha laysku guduudsho,
Mid intay ka ahaan, allow yaa dib ogaada!!!
Anna oogada Roma iyo U.N.O. meel la yiraahdo,
Iyo quurigaan ka affeeftay, iyo irdihii Cadameed,
Iyo oodda aan joogno, Soomaalaadka intaas ah,
Iftiinkii wada gaaray, afkayguu ka baxaayey,
Anna lay arki waayey, xaqa meelsha ku oodan,
Ooffuhuu ka dillaaco, allow yaa dib ogaada!!!!

(Faarax Shuuriye)

## GABAY

Nin hadduu cimriyo oo wax badan    cagaha meel saaro
Mar uun baa cirshiga mayd ka yimid    cunaha taabtaaye
In badan baad cokani dheelmadtoo    ciri-gò baa kaa dhow

(Qammaan Bulxan)

---

## GABAY

Layskama tummaatiyo wadnaha    teedka feeraha e
Tunka layma soo qaban Cabdow!    tuunni dabadeed ι
Hadalkii la tuugaysan jiray    waan ka toganaaye

(Cali-dhuux)


DHIGMADA IYO FAAFINTA

**Tel. 3009** **Sanduuqa 388**

SHIRKADA SANADA

| | | |
|---|---|---|
| Gudaha: | | Sh. So. 15 |
| Dibadda: | (badda) | » » 20 |
| | (dayuuradda) | » » 60 |
| Qiimaha: | | **Sh. So. 1** |

MUQDISHOW

Jamhuuriyadda (Somalida)